



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Luulyo 21, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Macluumaadka Cusub ee Adeega Koox Ahaaneed

Sidii aan ku tilmaamay [farriintii Agaasimaha ee hore](#), ODDS waxay hirgelinaysaa noocyada heerarka lacageed oo cusub Luulyo 2022.

Noocyada heerarka lacageed oo cusub ayaa hadda laga heli karaa dhanka internet-ka [website-ka Compass](#).

Si loogu oggolaado daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska in ay bilaabaan qorshaynta Luulyo 2022, adeega koox ahaaneed ayaa la heli karaa si looga fiiriyo eXPRS laga bilaabo Khamiista, Luulyo 22, 2021.

[Qoraalka Macluumaadka](#) ayaa bixiya tilmaamo la raacayo oo gaar ah oo ku saabsan sida loo helo macluumaadkaasi.

Isaga oo qayb ka ah Mashruuca Compass ee ODDS, oo bilaabmay dayrtii 2017, noocyadan heerarka lacageed waxay ku saleysnaan doonaa adeega koox ahaaneed sida lagu go'aamiso Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA).

Hirgelinta heerka lacageed ee cusubi waqtigan la joogo saameyn kuma yeelanayo saacadaha guriga-dhexdiisa ee loogu talagalay dadka. Macluumaad dheeraad ah ayaa mustaqbalka la heli doonaa oo ku saabsan saacadaha guriga-dhexdiisa. Adeegyada hadda jira isma beddeli doonaan ee loogu talagalay dadka.

Buug gacmeedyada adeega koox ahaaneed oo sharraxaya sida dadka loogu qoondeeyo adeega koox ahaaneed oo ku saleysan ONA ay leeyihiin ayaa sidoo kale [hadda la soo geliyay internet-ka](#). Buug gacmeedyada ayaa la helayaa oo ku qoran luqaddo badan waxaana loo kala qaaday koox da'eed ahaan.

Xusuusnow, adeega koox ahaaned iyo heerarka lacageed ee la xiriira lama hirgelin doono ilaa laga gaarayo Luulyo 2022. ODDS ayaa waqti hore sii deynaysa macluumaadkani si loo oggolaado qorshe horumarsan. Habkani, si ay dadka, qoysaska iyo Hay'adaha Maamulka Kiisku u haystaan waqti lagu xaqiijiyo in qiimeynta ONA si sax ah uga turjumayo baahida qofka waqti aad uga horeeya hirgelinta heerka lacageed. ODDS waxay horraanta 2022 bixin doontaa macluumaad dheeraad iyo tababar ku saabsan iska reebida nidaamka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.